

# Ku socota qofka saacadaha kooxda ka sameynaya Slusscaféet



Slusscaféet waxaa maamula Skoftebyns IF wixii ka dambeeyey 1984.

Slusscaféet waxaa lagu yaqaan ismariska qawqabka macaan ee lagu raaxeesanayo cunitaankiisa kuna yaala jawi qurux badan dhinaca kaabadda doonyaha ee Trollhättan.



Slusscaféet  
Slussledsvägen 5  
461 34 Trollhättan  
079-3417750  
cafe@skoftbynsif.nu

**Waxaad faylkan ku baran doontaa sida looga sameeyo saacadaha kooxda (lagtimmar) Slusscaféet iyo sababta ay muhiim u tahay in la is caawiyo.**

## **Kani waa Slusscaféet**

Slusscaféet waa maqaayadda xilliga xagaaga ee furan sanad walba dhammaadka bisha abriil ilaa iyo bilowga bisha sebteember.

Slusscaféet waxa maamula Skoftebyns IF waxayna il dhaqaale muhiim u tahay ururka oo dhan. Waana mid ka mid ah goobaha shaqada ugu waaweyn Trollhättan ee dhallinyarada shaqeeya xilliga xagaaga, oo badigood u ciyaara Skoftebyns IF.

Shaqaalaha joogtada ah ka sokoow ayaa waxaa haddana gacan ka geysta hawlaha dhallinyarada ciyaartooyda iyo waalidiinta ayagoo si "lacag la'aan ah" ugu shaqeeya laba jeer xilli xagaa walba, Waxaana aan ku magacawnaa saacadaha kooxda (lagtimmar). Kuwa ku shaqeeya lagtimmar ma helayaan wax mushaar ah, taa bedelkeeda waxaa lacagta la siinayaa kooxdooda iyo waaxda dhallinyarada. Inta dad badan ay ka shaqeeyaan lagtimmar ayaa waxay lacag badan heleysa kooxda barnaamijka kubadda cagta.

Saacadaha kooxda (lagtimmar) waxay kaloo ururka u haysaa hawl waxtar muhiim leh ee dhinaca bulshadda. Waxay abuureysaa isku xirnaanta iyo wadajirka bulshadda oo ay si wadajir uga shaqeeyaan maqaayadda, waana hab ay dhallinyaradu ku tijaabiyaan nololsha shaqada. Dhallinyaro badan ayaa waxay kaloo u tahay tallaabada ugu horeysa ee ay shaqada xilliga xagaaga kaga helaan Slusscaféet.



## **Marka aad timaado Slusscaféet si aad u sameeyso saacadaha kooxda (lagtimmar)**

Waxaa mar walba meesha jooga qof ku soo dhaweynaya.

Waxaad magacaaga ku qoreysaa buugga shaqaalaha kadibna waxaad xidhaneysaa dharka shaqaalaha (funaanad gacma gaab, good wasakh-dhowr iyo koofiyad).

Kadibna waxaad ogaaneysaa waxa aad ka shaqeyneyso maalintaa. Maalin walba waa 2-8 qof ee ka socda koox walba ee ka shaqeyneysa saacadaha kooxda (lagtimmar).

Markaad xilli nasasho hesho waxaad diyaarsan kartaa cunto fudud: keega shaaha iyo farmaajo, khudaar iyo cabitaanka ama qaxwe. Haddii aad rabto inaad cunto wax kale waxaad ku iibsaa kartaa qiime dhimis 25% ah.



## Waxyaabahan baad ka shaqeyn kartaa Slusscaféet

### Masax miisaska

Waa muhiim in martideena ay dareemaan in goobteena ay meel qurxoon oo cusub tahay.



### Soo gurbi suxuunta

Marka ay bilaabanto iney buuxsanto goobta suxuunta la dhigo waxaa loo gurbinayaa oo la gelinayaa dhaqitaan.



### Kala saar weelasha

Muraayadaha, koobabka, maacuunta iyo suxuunta la geynayo dhaqitaan. Qasacadaha oo loo xareynayo rahanka. Haraaga cunnada iyo af tirtirka oo la dhigayo dib u habaynta. Warqadda jilicsan, bacda doolshada iwm oo la geynayo alaabaha gubta.



### Dhaqidida weelasha

Mashiinka dhaqidida weelasha waa degdeg oo sahal loo isticmaali karo.



### Ku buuxi meesha koobab, galaas iyo suxuun

Marka weelasha la dhaqo waxaa loo geynayaa martida mar labaad.



## Buuxi talaajada cabitaanada

Waa muhiim in mar walba talaajada ku jiraan cabitaano qabow, maalmaha kulaylkana aad bay u socdaan oo loo isticmaalaa.



## Cunto sameyn

Waxaad sameyn kartaa ismaris qawqab laakiin waxaad xitaa diyaarineysaa hawsha maalinta xigta, sida biyo raacinta saladhka iyo jarjaridda yaanyada.



## Ku socota qofka ka shaqeynaya saacadaha kooxda (lagtimmar)

- Waxaad tahay muhiim isbedel weyn ayeyna keenaysaa inaad timaado!
- Haddii aadan imaan karin islamarkaana aadan helin qof ku beddela, la soo socodsii Slusscaf  et [cafe@skoftbynsif.nu](mailto:cafe@skoftbynsif.nu) ama 079-3417750.
- Haddii aadan imaaneyn markaa hal qof baa meesha ka maqan taasoo mecneheedu tahay in dadka shaqeynaya ay si xooggan u shaqeeyaan ama ay qaataan shaqaale dheeraad ah taasoo keeneysa in naadiga uu lacag yar u helo mashruuca kubadda cagta.
- Haddii aadan imaaneyn waxaa markaa kooxdaadu heleysaa lacag ka yar intee loo qorsheeyey markaana laga yaabe ineysan awood u yeelan iney sameeyaan wixii la qorsheeyey.
- Waxaan aad kaaga mahadcelineynaa tabarucaadka aad siisay naadigeena kubadda cagta adigoo ka shaqeynaya saacadaha kooxda (lagtimmar) Slusscaf  et!

**Dhammaan waa loo baahan yahay!**

